



Codso daryeel caafimaad:

- adigoo galaya barta internetka Benefits.Ohio.Gov,
- taleefan udir (800) 324-8680, ama
- si shaqsi ah ugutag Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska.

Ka firi xafiiska deegaanka adoo galaaya bogga JFS.Ohio.Gov/County.

Wac Laynka Macaamiisha ee Tooska ah ee Medicaid oo ah (800) 324-8680 si lagaaga caawiyo buuxinta codsiga ama su'aalaha kale ee aad qabto.

Macluumaad dheeri ah waxaad kahelaysaa bogga Medicaid.Ohio.Gov.

Ohio

Department of
Medicaid

Ohio Medicaid

Ohio Medicaid waxay kor uqaadaa caafimaadka dadka reer Ohio, waxayna xoojidaa qoysaska ayadoo siinaysa daryeel tayo leh.

Ohio Medicaid waxay u adeegtaa:

- shaqsiyaadka danyarta ah
- haweenka uurka leh, saqiirada, iyo caruurta waawayn
- dadka waawayn
- dadka naafada ah

Gunooyinka (benefits) Ohio Medicaid waxaa kamid ah:

- daryeelka kahortagga
- adeegyada caafimaad ahaan muhiimka ah
- adeegyada caafimaadka habdhaqanka
- daawaynta dadka aalkolada iyo muqaadaraadka ku xiran
- daawooyinka laysku qoro iyo adeegyo kale

Gunooyinka Ohio

Inaad daryeel caafimaad si online ah uga codsato bogga Benefits.Ohio.Gov waqti ayay kuu badbaadinaysaa waxay kuu bilaabaysaa inaad nolashaada hagaajiso.

Barta internetka ee Gunooyinka Ohio wuxuu sidoo kale kugu xirayaa adeegyada kale ee aad ubaahan karto:

- fursadaha shaqo
- adeegyada shaqo la'aanta
- caawimaadda lacagta
- taageerada haweenka uurka leh iyo saqiirka
- daryeelka caruurta
- caawimaadda tamarta (energy)

Booqo barta internetka Benefits.Ohio.Gov ama wac 1-844-640-6446.